Xafiiska Helitaanka Luuqadda (Office of Language Access)
Hanaanka Cabashada Helitaanka Luuqadda

Dokumentigani wuxuu faahfaahinayaa tallaabooyinka uu dacwooduhu qaadi karo si uu u soo sheego ku fashilanka maxkamad maxalli ah ay ku fashilanto inay u qabato tarjumaan ama siiso kaalmo luuqadeed oo kale dhacdo la xidhiidha maxkamadda. Dacwooduhu wuxuu gudbin karaa cabasho ku saabsan arrin kasta oo la xidhiidha helitaanka luuqadda ee la macaamilka dacwoodaha ee Maxkamadda Caddaaladda Kentucky (Kentucky Court of Justice). Fadlan ogsoonow in soo gudbinta cabashada helitaanka luuqaddu aysan dhalin rafcaanka wixii go'aan ama amar ah ee ku lammaan. **Marka uu dacwooduhu codsado, Xafiiska Helitaanka Luuqadda wuxuu siin doonaa adeegyada helitaanka luuqadda ee ku habboon, oo uu ku jiro helitaanka tarjumaan, si uu uga caawiyo dacwoodaha dhammaytirka hanaanka cabashada.**

**1. Bilaabista Cabasho.** Qofku wuxuu soo gudbin karaa cabasho cabasho isagoo qaadaya tallaabooyinka soo socda:

• Cabasho ayaa la xareyn karaa laguna soo gudbin karaa onlayn iyada oo la buuxinayo **foomka cabashada onlaynka ah**.

• Cabashada waxa lagu soo gudbin karaa taleefanka iyada oo la wacayo 502-573-2350 lagana codsanayo in lagu xidho Xafiiska Helitaanka Luuqadda. Wakiil ka socda Adeegyada Tarjumaada Maxkamadda ayaa si khaas ah ula hadli dacwoodaha oo qaadi doona macluumaadka daruuriga ah si loo bilaabo hanaanka cabashada.

• Dacwadda waxa lagu soo gudbin karaa qoraal iyada oo loo dirayo warqad cabasho ah cinwaanka soo socda:

Administrative Office of the Courts
Attention: Office of Language Access
1001 Vandalay Drive
Frankfort, KY 40601

**2. Qaadashada.** Xafiiska Helitaanka Luuqadda wuxuu eegi doonaa cabashada wuxuuna ka qaban doonaa dhammaan macluumaadka la xidhiidha dacwoodaha. Haddii, qaadashada hore kadib, la go'aamiyo in cabashadu macquul tahay, Xafiiska Helitaanka Luuqaddu wuxuu siin doonaa dacwadda lambar qaadasho oo loogu talogalay raadraaca iyo fayl gareynta. Haddii se la go'aamiyo in cabashadu aysan macquul ahayn qaadashada hore kadib, Xafiiska Helitaanka Luuqaddu wuu laali doonaa cabashada wuxuuna ku wargelin doonaa dacwoodaha in tallaabo kale aan la qaadi doonin.

**3. Qiraalka Cabashada.** Marka laga reebo xaaladda arrimaha wakhtigoodu xaddidan yahay, Xafiiska Helitaanka Luuqaddu wuxuu ugu jawaabi dacwoodaha 10 maalin shaqo gudahood isagoo adeegsanaya warqad, iimeyl, ama taleefan si uu u qiro helitaanka cabashada. Xafiiska Helitaanka Luuqaddu wuxuu sidoo kale ka codsan karaa macluumaad iyo/ama caddaymo dheeraad ah dacwoodaha wakhtiga qiraalka si uu si buuxda ugu baadho cabashada. Marka dhacdadu tahay mid wakhtigeedu xaddidan yahay (tusaale, cabasho la xidhiidha dhageysi soo socda oo la muddeeyey ka hor dhammaadka 10ka maalin shaqo), Xafiiska Helitaanka Luuqaddu wuxuu ka shaqeyn doonaa inuu dedejiyo qiraalka iyo baadhitaanka ku xiga ee cabashada si uu ugu xalliyo arrinkii sax ah wakhtiga ku habboon.

**4. Ogaysiinta Maxkamadda Maxalliga ah.** Marka uu helo dhammaan macluumaadka iyo/ama caddaymaha uu codsaday, Xafiiska Helitaanka Luuqaddu wuxuu u diri doonaa warqad maxkamadda maxalliga ah ee laga soo cawday si uu u ogeysiiyo maxkamadda in cabasho la helay. Dhammaan tafaasiisha la xidhiidha ee khuseeya cabashada ayaa lagu qori doonaa warqadda. Fadlan ogsoonow in dhammaan cabashooyinka la xidhiidha shaqaalaha ama qandaraaslaha Xafiiska Helitaanka Luuqadda waxa lagu maareyn doonaa iyada oo la adeegsanayo borotokoolka anshax marinta shaqaalaha gudaha ee Xafiiska Maamulka Maxkamadda Kentucky (Kentucky Administrative Office of the Courts).

**5. Baadhitaanka Cabashada.** Xafiiska Helitaanka Luuqaddu wuxuu bilaabi doonaa baadhitaanka eedaymaha lagu sheegay cabashada 10 maalin shaqo gudahood kadib taariikhda la ogeysiiyo maxkamadda maxalliga ah helitaanka cabashada. Inkastoo hanaanka baadhistu uu kala duwanaan doono iyadoo lagu saleynayo tafaasiisha cabasho kasta, hawlaha suurogalka ah waxa ka mid ah wareysiga ka qeybqaatayaasha cabashada, oo ay ku jiraan qaadiyada, karraaniyada iyo tarjumaanada, iyo qoraal ka sameysiga dhammaan macluumaadka la ururiyay inta uu wareysigu socday.

**6. Dib-u-eegista Xafiiska Adeegyada Sharciga (Office of Legal Services).** Marka uu dhammaado baadhitaanku, Xafiiska Helitaanka Luuqaddu wuxuu u gudbin doonaa natiijooyinkiisa, oo ay kujiraan dhammaan wixii qoraalo iyo xal ah ee la soo jeediyay, Xafiiska Adeegyada Sharciga si uu dib-u-eegis ugu sameeyo. Iyadoo lagu saleynayo tilmaanta uu bixiyo Xafiiska Adeegyada Sharcigu, Xafiiska Helitaanka Luuqaddu wuxuu fari doonaa maxkamadda maxalliga ah inay fuliso xalka la soo jeediyay, soo jeedin doonaa in maxkamadda maxalliga ah ay fuliso xal cusub, amase wuxuu u sheegi doonaa maxkamadda maxalliga in cabashadu tahay mid bilaa macne ah. Maxkamadda maxalliga ah waxa looga baahan inay u gudbiso warbixinta geedi-socodka Xafiiska Helitaanka Luuqadda kadib marka la fuliyo wixii xal la soo jeediyay.

**7. Ogeysiinta Dacwoodaha.** Xafiiska Helitaanka Luuqaddu wuxuu u diri doonaa warqad dacwoodaha 10 maalin shaqo gudahood oo ka bilaabmaya taariikhda la helay warbixinta geedi-socodka si uu ugu faahfaahiyo tallaabooyinka ay maxkamadda maxalliga ah ay fulinayso kuna xallinayso cabashada.

**8. Kayd-xogeedka iyo Helitaanka Dadwaynaha.** Xafiiska Helitaanka Luuqaddu wuxuu yeelan doonaa kayd-xogeedka cabashooyinka iyo tallaabooyinka la qaaday si loo xalliyo, waana inay la siiyo dadwaynahu marka ay codsadaan.

**9. Mamnuucidda Aargoosiga.** “Lama oggola in helaha ama qof kale uu cabsi-geliyo, handadiyo, qasbo, ama takooro qof iyadoo ujeeddadu tahay inuu farogaliyo wixii xuquuq ama mudnaan uu bixiyo Title VI, ama maadaama uu sameeyey cabasho, marag-fur, kaalmayn, ama si uun uga qeybqaatay baadhitaan, dacwad ama dhageysi hoos yimaada qeyb-hoosaadkan.” 28 C.F.R. § 42.108(e)